AUSCO

Barnaamijka Tilmaan-siinta Dhaqaneed ee Australia

# Ammaan helidda

## DEGDEGGA

Markii wax degdeg ah jiraan, ka wac Saddex Eber (000)




Markii aad wacdo Triple Zero (000), waxaa lagu weydiin doonaa haddii aad u baahan tahay caawimaadda ambalaaska, dabka ama booliiska. Waa inaad sheegtaa magaca adeegga aad u baahan tahay. **Xusuusnow: keliya wac Triple Zero (000) haddii ay jirto wax degdeg ah.**

Haddii aadan ku hadlin Ingiriisiga, waxaad tiraahdaa **'Turjumaan'** iyo magaca luqadda aad ku hadasho.

Sarkaalka Triple Zero (turjumaanka):

- **magacaaga**
- **Cinwaanka** halka degdeggu ka jiro
- lambarka **taleefankaaga**
- **waxa** dhacaya
- **halka** uu degdeggu ka dhacayo.

Haddii aad buuqsan tahay oo aadan aqoon waxaad dhahdo, haysa-saarin. Ku jir khadka markaasna xiriiriyaha ayaa garan kara halkaad ka soo wacayso kuuna diri kara caawimaad.

**Adeegyada ambalaasku waa degdegga KELIYA.**
**Ogsoonow:** waxaa lagaa qaadayaa adeegan haddii aadan haysan private health insurance, ama aadan haysan health care card ama aadan haysan concession card.

## Ammaan ku-joogidda guriga dhexdiisa

### Biyaha

Waa ammaan in la cabbo iyo in wax lagu karsado biyaha tuubada. Ha cabin ama wax haku karsan biyaha warooyinka ama durdurada sababtoo ah biyahaasi way doorsoomi karaan. Biyaha kulul waxay keeni karaan gubasho. Waxaa muhiim ah in la hubiyo heerkulka ka hor intaan la gelin biyaha qubayska ama shaawarka ama gelinta carruurta biyaha dhexdooda.

### Korantada

Shoogga (argagaxa) korantada wuu dhaawici karaa waana dili karaa dadka.

Ha samayn:

- inaad dhigto qalabka korantada meel udhow saxanka ama weelka biyaha ee kale
- Inaad ku riddo waxyaalaha birta ah toostarka, maykrawayfka ama baraha korantada.








Dusha saree e istoofka iyo ofanka aad bey u kululaadaan. Markii aad wax karinayso, daabka dheriyada kulul gudaha u-jeeddi si aysan carruurta yaryar ugaari karin. Ka ilaali carruurta iridka oafanka maaddaama ay taasi aad u kululshahay.

### Gaaska

Gaaska waxaa loo adeegsadaa qaar kamid ah istoofyada, ofannada iyo hiitarada. Xir gaaska ofanka ama istoofka markii aad dhamayso adeegsigiisa. **Haddii aad** uriso gaaska ha daarin tarraqa sababtoo ah holaca ayaa gaaska qarxin kara. Eeg meesha uu ka imaanayo gaaska liigaya markaasna si degdeg ah u-xir.

### Daawooyinka iyo kiimikada

Dawooyinka iyo kiimikada qaarkood oo guud ahaan agagaarka guriga laga helo waxay sababi karaan waxyeello ama jirro daran. Dhig daawooyinka oo dhan meel aysan carruurtu ka heli karin. Ku xafid waxyaalaha wax lagu nadiifiyo Armaajada xiran halkaas oo aan carruurtu ka heli karin.

### Cuntada

Cuntada sida agabyada caanaha, hilibka iyo furuudka iyo qudaarta qaarkeed waa in lagu ridaa firiijka ilaa ay diyaar u noqdaan in la adeegsan karo. Cuntada qaarkeed waxay u baahan doontaa in loo kaydiyo si la-barafeeyey ilaa ay diyaar u noqoto in la kariyo. Waana inaadan mar labaad barafayn cuntada haddii la dhalaaliyey maaddaama ay kuu keeni karto xanuun. Dhaq furuudka iyo qudaarta ka hor intaadan cunin si looga dhaqo sunta cayayaanka. Ka dhig meelaha wax lagu kariyo oo dhan kuwo nadiif ah mar kastana dhaq gacmahaaga ka hor intaadan diyaarin cuntada.

### Dabka

Alaamyada qiiqa **waa in** loo adeegsadaa guryaha oo dhan. Alaamyada qiiqa waxay sameeyaan dhawaaq dheer haddii ay dareemaan qiiqa. Alaamyadu waxay ku shaqeeyaan batariga markaasna batariyada waa in la tijaabiyaa oo la baddelaa lixdii bilood oo kastaba. Taxadar gaar ah u-yeelo shamacyada iyo gumadyada sigaarka maaddaama ay yihiin waxyaalaha sababa dababka guryaha ka dhaca. Ha saarin dharka meel u dhow ama dusha hiitarada. Ka shaqee qorshihii aad uga baxsan lahayd gurigaaga dhexdiisa haddii uu dhaco dab kuna tababar arintan qoyskaaga.

## Ku-ammaan helidda waddada




### Goynta waddada

Halkan Australia, baabuurtu waxay ku socdaalaan dhinac bidixda ee waddada. Markii aad goynayso waddada, si taxadar leh ufiiri bidixdaada iyo midigtaada si aad u hubiso wixii gaadiid ah. Ka gooy waddada meesha nalalka baabuurta ama halka dadka lugta ah ka gooynayaan.

### Wadidda baaskiilka

Waa inaad xirataa koofiyadda loogu talo galay markii aad fuulayso baaskiilka. Baaskiilkaagu waa inuu leeyahay nalka hore iyo kan dambe markii aad wadanayso habeenkii. Dadka baaskiilada wataa waa inay ilaaliyaan dhammaan xeerarka waddada. Magaalooyin badan waxay leeyihiin laymanka baskiilka ugaarka ah. Uma baahnid laysan si aad baaskiilka ugu wadato waddada hase ahaatee waa inaad adeecdaa xeerarka waddada iyo xeerarka khuseeya baabuur wadidda (tus heerarka khamriga).

### Daroogooyinka iyo khamriga

Waa khatar waana sharci darro in baabuur la wato ayadoo ay jirto saamaynta daroogada ama khamriga. Haddii lagugu qabto adoo baabuur wada markii ay jirto saamaynta khamriga iyo daroogooyinka, waxaa lagugu ganaaxi karaa lacag xaddi weyn ah (gaanax), ama laysankaaga ayaa lagaa qaadayaa, ama xataa xabsi ayaa lagu dhigi karaa.